



# Hal Seattle Qorshaha Dhammayska Tiran ee Cusboonaysiinta Wayn

Qorshaha Dhammayska tiran ee Seattle waa hagaha sida magaaladayadu u kobocdo oo ay u samayso maalgelinta. Qorshahu waxa uu haggaa go'aamada Magaalada oo ku sabasan halka aanu ka helno shaqooyinka iyo guriyaynta, iyo halka aanu ku maal gelino gaadiidka, adeegyada nalka iyo biyaha, beeraha lagu nasto, iyo hantida kale ee dad waynaha. Hadafkayaga waa in laga dhigo magaalada sinaan badan, lagu noolaan karo, waara, iyo u adkaysiga bulshooyinka maalinta iyo dadka mustaqbalka degen.

Qorshayntayada la cusboonaysiiyay waxay ka hadlaan caqabadaha cusub iyo kuwii hore; sinaanta isirka, kharashyada guriyaynta, gaadhida fursada dhaqaale iyo waxbarasho, isbeddelka cimilada, iyo wax badan. Waxaanu sahamin doonaa habab kala duwan ee koboca iyo maalgelinta, oo ay la socoto farsamooyinka lagu yaraynayo cadaadiska bara kicinta.



**Guriyaynta**



**Shaqooyinka/  
Dhaqaalaha**



**Gaadiidka**



**Cadaalada Deegaanka/  
Isbeddelka cimilada**



**Beeraha lagu nasto/  
Meelaga furan**



**Meel ku  
noolaanshaaha**

## Codkaagu waxa uu qaabeeyaa qorshaha

Magaaladu waxay raadin doontaa rayiga dhammaan dadka deegaanka ah marka aanu samaynayno qorshaha. Waxaanu kugu marti qaadaynaa inaad ku soo biirto inaad wadaagto aragtidaada mustaqbalka ee Magaalada. Waxaad baran kartaa wax badan, macluumaadka asalka iyo xogta, iyo joogida ka qayb gelida ku biirida wixii cusub bogga [www.seattle.gov/opcd](http://www.seattle.gov/opcd).

Magaalo ahaan, waxaanu ku ballan qaadanaynaa diyaarinta waxyeelooyinka hore ee qorshayaasha hore iyo u shaqaynta dhanka mustaqbalka cid walba u diyaar tahay. Dhammaadkaas, Xafiiska Qorsahaynta & Horumarka Bulshadda (OPCD) waxay xooga saaraydaa codadka Madowga, dadka Asalka ah, iyo Bulshooyinka Midabka ah iyo buushooyinka kale inta badan la takooro gudaha nidaamyada qorshayna. Ballan qaadkan waxaa lagu qabtaa gudaha OPCD [Jawiga Ka qayb glaka Bulsja Eex aan ahayn](http://www.seattle.gov/opcd/about-us) (seattle.gov/opcd/about-us).

## Jadwalka Mashruuca

2022	Q2	Q3	Q4	2023	Q2	Q3	Q4	2024	Q2	Q3
<b>Bilaabida Mashruuca</b> Samee oo wadaaga salka mashruuca iyo agabyada ka qayb qaadashada dad waynaha				<b>Samaynta Qorshaha</b> Faaqid rayiga dad waynaha oo horumari hadafyo iyo xeerar				<b>Qorshaha U dambeeya + Aagag u samaynta</b> Soo gebagebee qorshaha Duqa magaalada oo wata beddelka koboca iyo aag u samaynta sharciga		
		<b>Qaabaynta Mashruuca</b> Aqoonso dhibaatooyinka wayn iyo koboca suuragalka ah eefarsameed				<b>Dib u eeg + Hagaaji</b> Faallada dad waynaha rasmiga ah ee falan qaynta farsamooyinka koboca iyo qorshaha qabyada ah				<b>Qaadashada Qorshaha</b> Dib u eegida Gollaha Magaalada, oggolaanshaha qorshaha u dambeeya, iyo hirgelinta

### Macluumaadka dheeraadka ah

[seattle.gov/opcd](http://seattle.gov/opcd)  
@SeattleOPCD  
fb.com/seattleopcd

**Hel faallo  
celin + wax  
badan baro:**



ISKAAN ISAAR

### La xidhiidh:

Michael Hubner  
michael.hubner@seattle.gov

## Istaraatiijiyada Kobaca

### Istaraatiijiyada Kobaca goobaha dadku ku badan yihiin ee magaalooyinka

Qorshaha Kobaca ee Qorshaha Guud waa himilada magaalada ee ku aaddan sida horumarka iyo maalgashiga deegaankeenna la dhisay ay u kobcin lahaayeen 20-ka sano ee soo socda si loo waafajiyo kororka tirada dadka iyo kobaca shaqada ee la filayo loona gaaro yoolalka Magaalada. Saadaasha ayaa sheegaysa in Seattle ay noqon doonto magaalo ay ku nool yihiin ku dhawaad hal milyan oo qof sanadka 2050. Cusboonaysiinta Istaraatiijiyada Kobaca waxay taageeri doontaa saadka, kala duwanaanta, iyo helitaanka guryo kiradooda la awoodi karo. Waxaan hiigsaneynaa inaan noqono magaalo loo siman yahay oo warta.

Qaababka istaraatiijiyada Kobaca:

- + halkaas oo aan ku horumarino goobaha la dego, ganacsiyada, iyo sancooyinka
- + noocyada guryaha cusub ee la ogolyahay (Apartments, townhouses, guryo kala gogoan)
- + sida aan u maalgelino adeegyada bulshada iyo tallaabooyinka ka hortagga barakaca


Istaraatiijiyada goobaha dadku ku badan yihiin ee Magaaladu waxay ku guulaysatay inay diirada saarto koritaanka. Tobankii sano ee la soo dhaafay, 83% guryaha cusub ee magaalada—oo u badan guryo yaryar—ayaa laga dhisay xaafado kooban, la socon karo, oo ah xaafado loo isticmaali karo siyaabo kala duwan oo ku xiran gaadiidka dadweynaha.

Si kastaba ha ahaatee, xaafado badan oo ka baxsan xudunta magaalooyinka ayaa guryaha la awoodi karo ay aad u yaryihiin kiradooduna aad bay kor ugu kacday magaalada oo dhan. Kirada guryaha qoysaska iyo lahaanshaha guryaha ayaa xadka ka baxsan meelo badan.

Falanqaynta Sinnaanta Jinsiga ee ay samaysay Magaaladu dhawaan waxa lagu ogaaday in Istaraatiijiyada Magaalada hoose ay marayso qaab taariikhi ah oo kala saarid ah oo ay kordhiso cadaadiska barokaca ee bulshooyinka midabka leh.

### Cusbooneysiinta istaraatiijiyadda kobaca ayaa naga caawin doonta

- + Dhismaha guryo badan oo kala duwan magaalada oo dhan
- + Taageerada guryo jaban oo la awoodi karo
- + Wax ka qabashada taariikhdeena kala soocida iyo yareynta cadaadiska barakaca
- + Dhiirigelinta dhismaha guryo badan oo ku dhow maalgashiyada cusub ee gaadiidka dadwaynaha
- + Wax ka qabashada isbedelka cimilada iyo yaraynta ku tiirsanaanta baabuurta



For more information

- [seattle.gov/opcd](http://seattle.gov/opcd)
- [fb.com/seattleopcd](https://www.facebook.com/seattleopcd)
- [instagram.com/seattleopcd](https://www.instagram.com/seattleopcd)
- [@SeattleOPCD](https://twitter.com/SeattleOPCD)

Give feedback + learn more



Seattle  
Office of Planning &  
Community Development

Contact

OneSeattleCompPlan@seattle.gov

## Warbixinta Saamaynta Deegaanka

Waxaan baran doonaa faa'iidooyinka iyo saameynta hababka kala duwan ee loo marayo koritaanka iyada oo qayb ka ah warbixinta Saamaynta Deegaanka (EIS). Waxaan qorsheyneynaa inaan ogaano noocyo badan oo kala duwan oo ka tarjumaya fikrado kala duwan oo aan helnay waqtigii kulanada ka-qaybgalka

dadweynaha si aan siino fikrado kala duwan saraakiisha la soo doortay marxaladda xigta ee habka cusboonaysiinta Qorshaha.

Qoraal qabyo EIS ah ayaa diyaar u ah dib u eegista iyo faallooyinka dadweynaha guga 2023. Istaraatiijiyadda ugu dambeysa ee kobaca, oo la dhammeyn doono 2024,


ayaa la filayaa inay noqoto hab isku-dhahan oo tusaya xeeladaha iyo goobaha is beddelka.

**Beddelka 1: Wax Talaabo ah ma jirto**  
Waxaan baran doonaa istaraatiijiyadayaada Magaalada hoose ee hada jirta si ay u noqoto barta isbarbardhigga.

### Beddelka 2: Diirada la saaray

Fursado badan oo loogu talagalay guriyeynta aagagga cusub ee loo yaqaan barroosinnada xaafaddawaxay xuddun u yihiin degmooyinka ganacsi ee jira.

- Neighborhood Anchor
- Urban Center
- Urban Village
- Manufacturing & Industrial Center



**Barroosinnada xaafadda:** meelo leh guryo kala duwan iyo adeegsiyaal isku dhafan oo lagu taageerayo xaafado dhammaystiran


**Xarunta Magaalada:** xaafado gobol ahaan loo qoondeeyay oo leh adeegsi kala duwan, guriyeyn, iyo shaqo

**Tuulada Magaalada:** Aag leh noocyo kala duwan oo guryo iyo gaadiid, adeegyo, iyo shaqooyin

### Beddelka 3: Ballaaran

Qaybo badan oo kala duwan oo ah xulashooyinka guriyeynta hoose, sida triplexes iyo fourplexes, ee **aagaga deegaanka ee hada jira ee Neighborhood Residential (NR)** kuwaas oo hadda ogol kaliya guryaha goonida ah.

- Neighborhood Residential zoning
- Urban Center
- Urban Village
- Manufacturing & Industrial Center




**Aagagga la deggan yahay ee xaafadda:** dabacsanaan cusub oo loogu talagalay doorashooyinka guryeynta ee dhammaan aagagga deegaanka ee Xaafadda

### Beddelka 4: Marino

Guryo kale oo dheerad ah oo 5-daqiigo oo socod ah u jira goobaha gaadiidka dadwaynaha iyo parkska

- Corridors
- Urban Center
- Urban Village
- Manufacturing & Industrial Center




**Marino:** dabacsanaan cusub oo loogu talagalay doorashooyinka guryaha iyo isticmaalka kale ee meelaha u dhow gaadiidka dadwaynaha

### Beddelka 5: La isku daray

Xeelado isku dhaf ah oo lagu bixinayo doorashooyin badan oo lagu helayo guryo iyo adeegyo

- Neighborhood Anchor
- Corridors
- Neighborhood Residential zoning
- Urban Center
- Urban Village
- Manufacturing & Industrial Center



For more information

[seattle.gov/opcd](https://seattle.gov/opcd)  
[fb.com/seattleopcd](https://fb.com/seattleopcd)  
[instagram.com/seattleopcd](https://instagram.com/seattleopcd)  
[@SeattleOPCD](https://twitter.com/SeattleOPCD)

Give feedback + learn more



 **Seattle**  
Office of Planning & Community Development

Contact

[OneSeattleCompPlan@seattle.gov](mailto:OneSeattleCompPlan@seattle.gov)

# Qorshaha Guud ee One Seattle

## Guriyeynta

Bulshooyinka caafimaadka leh waxay ku tiirsan yihiin guryo nabdoon oo deggan. Gurigu waxa uu taageeraa caafimaadka jidhka iyo maskaxda, xasiloonaada dhaqaalaha, fursad waxbarasho iyo dhaqaale, iyo tayada nolasha.

Dhibaataada guriyeynta Seattle waxay dadka ku adkaynaysaa inay helaan oo ay joogaan guri la awoodi karo oo iyaga u shaqeeya. Aragtidayada Seattle waa magaalo loo wada dhan yahay oo soo dhawaynaysa oo leh doorashooyin badan oo guryo nooc kasta ah, oo ay ku jiraan guryaha qoysaska iyo shakhsiyaadka dakhligoodu hooseeyo.



Detached house

Median sales price (2021)

\$950,000

Household income at which costs are affordable

236% of AMI for a family of 3



Townhouse

\$740,000

184% of AMI for a family of 3




Condo / co-op

\$500,000

130% of AMI for a family of 2

AMI: dakhliga dhexe ee aagga

Source: King County Department of Assessments




Redlining (bidix) bulshooyinka midabka leh ee laga reebay helitaanka amaahda si ay guryo u iibsadaan oo ay hanti u dhistaan. Axdiyada jinsiyadeed waxay ahaayeen heshiisyo sharci ah oo ka mamnuucaya dadka midabka leh inay hanti ku yeeshaan xaafado badan oo ka tirsan Seattle ah (midig).

## Guryo aan la heli karin

In kasta oo dhawaan la dhisay guryo, haddana waxa weli jirta gabaabsi joogto ah oo xagga sicirka suuqa ah iyo dadka dakhligoodu xaddidan yahay labadaba. Tani waxay ka dhigaysaa lahaanshaha guryaha mid aanay gaadhi karin badi qoysaska Seattle waxayna ka dhigaysaa kirada guryaha mid qaali ah. Kala duwanaanshaha jinsiyadeed ee hantida, lahaanshaha guryaha, culeyska qiimaha guryeynta, iyo guri la'aanta ayaa muujinaysa sinnaan la'aanta nidaamka guryeynta.

Muuqaalka guryeyntayadu wuxuu ka tarjumayaa xoogga suuqa iyo taariikhda dhaqamada takoorka. Waagii hore, siyaasadaha guryeynta iyo dhaqamada cunsuriga ah waxay si cad u diidi jireen lahaanshaha guriga dadka midabka leh waxayna xaddiday halka ay ku noolaan karaan.

### Homeownership in Seattle by race of householder



Source: American Community Survey, 2016-2020

## Guriyeynta Qorshaha Guud

- + Qorshuhu wuxuu dejiyaa aragtida mustaqbalka ee guryaha qiimaha suuqa ah iyo guryaha dadka dakhligoodu hooseeyo ee la awoodi karo. **Kordhinta sahayda guryaha** si loo balaadhiyo fursada, loona habeeyo koritaanka mustaqbalka, loo yareeyo cadaadiska qiimaha, waxna laga qabto wax soo saar la'aantii hore.
- + **Dhiirrigelinta noocyo badan oo guryo kala duwan ah** oo si ka wanaagsan u buuxinaya baahiyaha bulshada hadda iyo mustaqbalkaba.
- + **Horumarinta iyo ilaalinta guryaha kirada ah iyo kuwa iibka ah ee dakhligoodu xaddidan yahay**, si loo daboolo baahiyaha qoysaska dakhligoodu yar yahay.
- + **Ka hortagga barakaca iyo wax ka qabashada ka saaridda.**

For more information

[seattle.gov/opcd](https://seattle.gov/opcd)  
@SeattleOPCD

[fb.com/seattleopcd](https://fb.com/seattleopcd)  
[instagram.com/seattleopcd](https://instagram.com/seattleopcd)

Give feedback + learn more



**Seattle**  
Office of Planning & Community Development

Contact

OneSeattleCompPlan@seattle.gov

## Xeeladaha ka-hortagga barakaca

### Waa maxay barakacu?

Barakaca ayaa ah in dadka deegaanka, ganacsiyada iyo xarumaha si aan ula kac ahayn loo raro iyadoo ay sabab u tahay awood ka baxsan gacantooda. Sababta asaasiga ah waa yaraanta iyo korodhka qiimaha guryaha iyo goobaha ganacsiga. Dadka ayaa sidoo kale ku barokacay ka saarid, dib-u-dhis, ama dhicitaanka axdiyada guryaha dakhligoodu xadidan yahay.


### Ka jawaabista cadaadiska barakaca

Qorshuhu wuxuu naga caawin doonaa inaan kordhino guryaha iyo doorashada, taas oo muhiim u ah wax ka qabashada yaraanta keenaysa qiimaha oo kor u kaca. Waxaan isticmaaleynaa Tilmaanta Khatarta Barakaca si aan u ogaanno halka lagu dhiirigelinayo guryo badan iyadoo la yareynayo cadaadiska qoysaska dakhligoodu yar yahay, dadka midabka leh, ganacsiyada BIPOC iyo hayadaha, iyo kuwa kale ee khatarta ugu jira barakaca.

### Aaladaha suurtagalka ah ee ka hortagga barakicinta waxaa ka mid ah

- + Shuruudaha cusub ama dhiirigelinta guryo la awoodi karo oo magaalada oo dhan ah
- + Isbeddellada lagu samaynayo guryo la awoodi karo iyo mashaariicda horumarineed ee loo siman yahay si ay u noqdaan kuwo macquul ah oo kor loogu qaado maalgashiga dadweynaha
- + Maalgelinta ururada bulshada si ay u iibsadaan hanti
- + Ilaalinta kiraystaha oo xooggan, sida kaalmada dib u dejinta
- + Taageerada ganacsiyada iyo machadyada jira si looga caawiyo inay sii joogaan

### Preliminary Displacement Risk Index



The Displacement Risk Index is based on neighborhood characteristics like the presence of vulnerable populations and amenities that increase real estate demand. This analysis helps us evaluate likely outcomes of different alternatives and potential strategies to address the displacement pressures community members are experiencing today.



Dhisitaanka Tuulada Itoobiya, 2021

For more information

- [seattle.gov/opcd](https://seattle.gov/opcd)
- [fb.com/seattleopcd](https://fb.com/seattleopcd)
- [@SeattleOPCD](https://twitter.com/SeattleOPCD)
- [instagram.com/seattleopcd](https://instagram.com/seattleopcd)

Give feedback +  
learn more



Contact

Seattle  
Office of Planning &  
Community Development

[OneSeattleCompPlan@seattle.gov](mailto:OneSeattleCompPlan@seattle.gov)

# Qorshaha Guud ee One Seattle

## Noocyada

Noocyada guryuhu waxay ku kala duwan yihiin tirada guryaha, sida loo habeeyey, haddii ay yihiin kuwo la leeyahay ama kuwo la kiraystay. Looxani waxa uu muujinayaa noocyo kala duwan oo tusaaleyaal guryo ah oo saddex qaybood ah.

### Guryaha go'doosan waxay ku yaalaan dhisme iyaga u gaar ah oo aan la wadaagin gidaarada guryaha kale



#### Guri gooni ah oo ku yaal dhul aad u yar

Guri jira oo lagu ilaaliyo oo leh laba guri oo cusub oo lagu daray gadaasha (bidix) iyo saddex guri oo ku yaal hal meel (midig)



#### Unug guriyeedka dheeriga ah (DADU)

Qayb labaad oo lagu daray meel la dego, oo badanaba ka dambaysa guriga weyn



#### Guri guri

uryo gaar ah oo ka kooban 2-3 dabaq ayaa lagu habeeyay agagaarka meel bannaan oo la wadaago

### Guryaha isku dheggan waxay la wadaagaan gidaarada guryaha kale, kuwas oo qayb kastaa si toos ah loo leeyahay



#### Duplex & triplex (dhinac-dhinac)

Laba ama saddex qaybood oo gidaarada wadaaga

#### Townhouse & rowhouse

Guryaha derbiga la wadaaga guri kale oo dhammaantood si toos ah loo yeelan karo

#### Courtyard housing

Guryo isku dheggan oo ka kooban 2-3 dabaq oo lagu habeeyey meel bannaan oo la wadaago

### Guryaha is dul saaran waxa ku jira qaybo badan oo si toosan loo habeeyey

#### Afar geesood

Qaab dhaqameed leh laba qol dabaqiiba gudaha qaab dhismeed inta badan u eg guri weyn



#### 6-plex

Qaab dhismeed saddex dabaq ah oo leh laba guri dabaq kasta



#### 8-plex

Qaab dhismeed afar dabaq ah oo leh laba guri dabaq kasta



#### Apartments iyo condos ka kooban 5-8 dabaq

Dhismayaal dherer dhexdhexaad ah oo ku leh guryo badan dabaq kasta oo loo kiraysan karo sidii apartment ama la yeelan karo sidii condominium units



#### Guryaha dhaadheer & condos

Dhismayaal ka sarreeya 12 dabaq oo ku leh guryo badan dabaq kasta oo loo kireysan karo sidii

For more information

[seattle.gov/opcd](https://seattle.gov/opcd)  
@SeattleOPCD

[fb.com/seattleopcd](https://fb.com/seattleopcd)  
[instagram.com/seattleopcd](https://instagram.com/seattleopcd)

Give feedback + learn more



Seattle Office of Planning & Community Development

Contact

[OneSeattleCompPlan@seattle.gov](mailto:OneSeattleCompPlan@seattle.gov)

## Hal Seattle Qorshaha Balaadhan GOOBAHA NASASHADA & GOOBAHA FURAN

Goobaha nasashada iyo goobaha waa kaabayaasha dhaqaale ee muhiimka u ah caafimaadka iyo badqabka bulshadeena iyo deegaankeenaba. Goobaha nasashada dibada ee kuyaala Seattle oo ay kujiraan kala duwanaanshaha wayn ee goobaha iyo iskuxidhka: Baarkino, Beeraha P-Patch, goobaha cagaaran ee xaafadaha, meelaha ay wadooyinku ku dhamaadaan, iyo inkaloo badan. Shabakadan waxay ina siinaysaa inaga fursado raaxaysi, jimicsi, ciyaar, inaan la falgalno dabecada, aan ku raaxaysano waxqabadka iyo xafladaha dhaqanka, lakulano jaarkeena, oo la joogno saaxibadeen iyo qoysaskeena.

Inkabadan 1,000 goobo dawladeed oo kala duwan oo Seattle ku yaala ayaa waxay yihiin meelaha ugu wanaagsan ee nidaamka wadanka. Aaminaada Dhulka Dawlada, meelaha qaranka ee aan faa'ido doonka ahayn, heerarka nidaamka Seattle wuxuu ku jiraa 10 ugu sareeya Maraykanka, lakin wali waxa jira shaqo u baahan inaan hagaajino.

Go'amadii maal-gashi ee hore waxa ay sii kordhiyeen faraqa isirnimo ee waxyeellada deegaanka iyo helitaanka meel cagaaran. Maalgelinta cagaaran ee mustaqbalka waa in ay diiradda saaraan wax ka qabashada faraqa u dhexeeya iyaga oo sidoo kale abuuraya shaqooyin, fursad dhaqaale, iyo guryo la awoodi karo si loogu oggolaado bulshooyinka BIPOC inay ku joogaan meeshooda.

### Arimaha Waawayn




**Helitaanka Loo Simanyahay ee Goobaha Dawlada**



**Cadalaada Deegaan iyo Caafimaadka Deegaanka**



**Dhaqanka, Farshaxanka, iyo Bulshada.**



**Adkaysiga iyo Yaraynta Dhibaataada Isbadalka Cimilada**

Cusboonaysiinta Qorshahan balaadhan, waxaan raadin doonaa istaraatiijiyado kuwaasoo lagu balaadhinayo, laysku xidhayo, lagu wanaajinayo, oo lagu ilaalinayo shabakada goobaha dawlada ee Seattle. Waxaan udub dhexaad u noqon doonaa sinnaanta jinsiyadda shaqadeena si aan u taageerno caafimaadka iyo fayyo-qabka dhammaan bulshooyinka ku nool magaaladeena sii kordheysa. Waxaan ka fiirsan doonaa sida goobta dadweynaha ay gacan uga geysan karto bixinta adkeysiga wajiga isbeddelka cimilada. Waxaan sidoo kale eegi doonaa siyaabaha aan ku gaadhsiin karno hagaajinta cagaaran xaafadaha u nugul barakaca siyaabaha taageeraya xasilloonida bulshada.

## Maxaan Hada Ka Shaqaynaynaa

- [Goobaha Nasashada iyo Madadaalada Seattle ee hadda jira \(SPR\) iyo hindisayaasha](#) 
- [SPR Hirgalinta Qorshaha Istaratiijiyada](#) 
- [Barnaamijka Guud ahaan Magaalada Seattle](#) 
- [Waaxda Gaadiidka ee Seattle Barnaamijka Maareynta Goobaha Dadweynaha](#) 

## Aan Ka Hadalno Wax Ku Saabsan Mustaqbalka

Sideen u samayn karnaa goobo dadwayne oo soo dhawayn badan isla markaana la isticmaali karo?

Waa maxay hababka aan ku wanaajin karno iskuxidhka ee u dhaxaysa goobaha nasashada iyo goobaha qurxoon?

Sidee goobaha dadwaynaha loo wanaajin karaa si loo taageero caafimaadka deegaanka iyo bani'aadamkaba?

Sidee nidaanyada goobaha dadwaynaha u siiyaan bulshada adkaysiga waajihitaanka isbadalka cimilada?

Waa maxay hababka goobaha dadwaynuhu ay ugu adeegi karaan dad badan?

Waa maxay nooca hawlaha ama dhacdooyinka dadka soo jiidan kara si ay ugu qaataan wakhti badan dibada?



Udir faalooyinkaaga:  
[oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov)



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo:  
[seattle.gov/opcd/one-seattle-plan](https://seattle.gov/opcd/one-seattle-plan)

Si aad u hesho dhokumantigan oo habkale ama luuqad kale ah, la xidhiidh [oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov) si aad u codsato hoyga naafada ee xaflada ama kulanka, la xidhiidh [oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov) fursadaada ugu horaysa.

# Hal Seattle Qorshaha Balaadhan ISBADALKA CIMILADA

Isbadalka cimiladu haduu dhacayaa, oo saamayntuna waxay waxyeelaynaysaa bulshadeena. Laga bilaabo kulaylka xad kabaxa ah iyo kaymaha gubanaya ee dikhaynaya hawadeena, heerka biyaha badda ee kordhaya iyo daadadka xad kabaxa ah, Seattle waxay waajahaysaa saamaynta isbadalka cimilada. Sida magaaloyinka kalaba, Seattle waxay la tacaalaysaa inay maarayso saamaynahan dhibaata badan. Isla markaana, waa inaan hada wax qabanaa si aan u yarayno shucaaca kaarboonka kaasoo kaqaybqaata isbadalka cimilada ee mustaqbalka ee ka imanaya labadeena ilood ee ugu waawayn: gaadiidka iyo dhismayaasha.

Buuxinta hadafyadeena cimilada sidoo kale waa fursad si shaqooyin loogu abuuro oo loo horumariyo isbadal la taaban karo oo ku aadan dhinaca tamarta la cusboonaysiin karo iyadoo la horaysiinayo maalgashiyada bulshada kuwasoo taariikh ahaan dhaawacaya dhaqaalaha, jinsiga, iyo cadaalad darada deegaan.

## Shucaaca gaasta guryaha cagaaran ee Seattle waa kuwo koraya.

Qashinka

Dhismayaasha


Warshada

Gaadiidka

## Cusboonaysiinta Qorshaha Balaadhan ee Isbadalka Cimilada

Qorshaha Balaadhan waxa ku jiri doona siyaasado cusub oo cimilada ah kuwaasoo awooda lagu saari doono yaraynta shucaaca ka imanaya dhismayaasha iyo gaadiidka, iyo inaan kadhigno magaaladeena mid awood u leh fahamka saamaynta isbadalka cimilada. Siyaasada waawayn waxay u keeni karaan Seattle in kaarboonku noqdo dhexdhexaad sanadka 2050 iyo in laga caawiyo magaalada sii socoto halkii ay ka kici lahaayeen heerka biyaha badda, mawjadaha kulaylka, duufaanaada iyo fatahaadaha xad kabaxa ah. Seattle waxa ka go'an inaan la shaqaynayo shuraakadayada si loo gaadho dagmada, gobolka iyo hadafyada guud ee gobolka oo dhan.

## Arimaha Waawayn



Yaraynta Shucaaca



Shaqooyinka Cagaaran



Laqabsashada Cimilada iyo Adkaysiga

## Maxaan Hada Ka Shaqaynaynaa

- [Inaan maarayno guryaha cagaaran ee soo saara hawada](#) ↓
- [In loo badalayo gaadiidka tamar nadiif ah](#) ↓
- [Dhisitaanka goobo cagaaran](#) ↗
- [Hagaajinta Dhismayaasha](#) ↓
- [Qorshaha kaliya isbadalka loo simanyahay](#) ↗
- [Ka dhig bulshooyinka safka hore kuwo u nugul](#)

saamaynta cimilada ↗

- [Khariirada goobaha u nugul dhibatooyinka dabiiciga ah ee ay keentay isbadalka cimiladu change](#) ↗


## Aan Ka Hadalno Wax Ku Saabsan Mustaqbalka

Waa maxay warwarka ugu wayn ee ku saabsan isbadalka cimilada?

Waa maxay inta waxa ka badan ee aan samayn karnaa si aan u yarayno shucaaca gaasta guryaha cagaaran ee ka imanaysa gaadhiyaasha iyo dhismayaasha?

Waa maxay intaa waxa kabadan ee qaban karno si aa u abuurno shaqooyin iyo fursadaha u badalitaanka oo aan eber uga dhigno shucaaca kaarboonka?

Waa maxay waxa intaa kabadan ee qaban karno si aan u ilaalino goobaha iyo dadka aadka ugu nugul isbadalka cimilada (heerka biyaha badda ee kordhaya, daadadka, kulaylka xad dhaafka ah, iwm)?



Udir faalooyinkaaga:  
[oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov)



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo:  
[seattle.gov/opcd/one-seattle-plan](https://seattle.gov/opcd/one-seattle-plan)

Si aad u hesho dhokumantigan oo habkale ama luuqad kale ah, la xidhiidh [oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov) si aad u codsato hoyga naafada ee xaflada ama kulanka, la xidhiidh [oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov) fursadaada ugu horaysa.

## Dhexdhexaadinta sinnaanta

### Wax ka qabashada waxyeellooyinkii hore

Taariikhda qorshaynta Seattle waxa lagu asteeyay cunsuriyada isticmaalka dhulka iyo siyaasadaha guryeynta iyo dhaqamada abuuray kala saarista iyo kala soocida dadka iyadoo loo eegayo jinsiyada, qowmiyada, iyo heerka.

Habka ka saarida ayaa bilaabmay wax yar ka dib imaatinka dadka cadaanka ah ee leh sharciyo xaddidaya cidda geli karta oo degi karta Seattle. Dhaqankani waxa uu sii socday ilaa qarnigii 20aad iyada oo ay jirtay sharciyo xaddiday in dadka midabka leh helaan amaahda guriga, iyo sidoo kale axdiyada xaddidan ee jinsiyadda.

Saamaynta taariikhdan ayaa ah mid muuqata maanta iyadoo weli ay jirto kala qaybsanaan iyo kala duwanaan joogto ah. Natiijooyinkan waxaa lagu xoojiyay xeerarka isticmaalka dhulka ee hadda xaddidaya helitaanka xulashooyinka guryaha jaban ee xaafado badan.

Qorshaha Guud ee one Seattle waa fursadeena si aan u jaan-goyno mustaqbal jinsiyadeed oo siman.



### Horumarinta sinnaanta jinsiyadeed

Si loo hubiyo in qorshuhu horumariyo sinnaanta jinsiyadda, waxaan isticmaaleynaa Toolkit-ka Sinnaanta Jinsiga, hanti aan inta badan ku shaqeyno taaso qayb ka mid ah Hindisaha Jinsiga iyo Cadaalada Bulshada Seattle. Talaabada kowaad ahaan, waxaanu aqoonsanay natiijooyin qabyo ah oo ku saabsan sinnaanta jinsiyada oo aan raadineyno inaan ku gaarno Qorshaha One Seattle. Xubnaha bulshadu waa inay sidoo kale isticmaalaan natiijooyinkan sinnaanta jinsiyadeed si ay ula xisaabtamaan Magaalada marka aan dhamaystireyno qorshaha.

Waxaan hadda waydiisanaynaa ra'yi-celin bulsho oo ku saabsan natiijooyinkan sinnaanta jinsiyadeed ee qabyada ah. Waa maxay natiijooyinka sinnaanta jinsiyadeed ee ay tahay in aan isticmaalno si aan u hagno Qorshaha? Rayi bixinta dadka midabka leh iyo ururada bulshada ku salaysan ayaa si gaar ah muhiim u ah.

Wax badan ka ogow oo  
qaado sahankeena.



Wax badan ka baro taariikhda Seattle ee ku saabsan qorshaynta takoorka iyo dhaqamada isticmaalka dhulka iyo sida aanu u xididada ugu aasayno sinnaanta Qorshaha Guud ee one Seattle.



Watch the video



For more information

[seattle.gov/opcd](https://seattle.gov/opcd)  
[@SeattleOPCD](https://twitter.com/SeattleOPCD)

[fb.com/seattleopcd](https://fb.com/seattleopcd)  
[instagram.com/seattleopcd](https://instagram.com/seattleopcd)

Give feedback +  
learn more



Seattle  
Office of Planning &  
Community Development

Contact

[OneSeattleCompPlan@seattle.gov](mailto:OneSeattleCompPlan@seattle.gov)

# Hal Seattle Qorshaha Balaadhan GAADIIDKA

Meel kasta oo aad u socoto - haddii aad tagayso shaqo ama dugsi, saaxiibo aad booqanayso, hawlo shaqo, tagayso goobtaada cibaadada, ama cashada aad u baxayso - waa in aad si badbaado leh, karti leh, oo qiimo jaban u qaban kartaa.


Marka laga soo tago buuxinta godadka iyo caawinta basaska iyo keenista xamuulku inay ku socdaan waqtigii loogu talagalay, shaqaalaha Magaaladu waxay sidoo kale jeexjeexaan waddooyinka, hagaajiyaan calaamadaha taraafigga, abuuraan goobo dadweyne oo xiiso leh, waxayna dhisaan shabakad haadad baaskiillo iyo waddooyin lugeed si ay ugu adeegaan dadka da' kasta iyo awood kasta leh.

Inta badan, marka qorshayaasha dawladda la horumariyo, waxay meesha ka saaraan dad aad u badan, gaar ahaan Madow, Asalkii hore, ama qayb ka mid ah bulshada midabka leh; dadka LGBTQIA+; dadka ku nool faqriga; bulshooyinka soogalootiga ah iyo dadka aan ku hadlin Ingiriisiga markay guriga joogaan; dhalinyarada; dadka waaweyn ee da'da ah; iyo dadka naafada ah. Markaan horumarineyno aragtida gaadiidka wadajirka ah, waxaan rabnaa inaan maqalno qof walba codkiisa oo aan hubinno inaan buuxinno baahidooda.

## Gaadiidka kujira Cusboonaysiinta Qorshaha Balaadhan

Qorshaha waxaa ku jira arin gaadiid oo ka kooban hagitaan siyaasadeed oo ballaadhan oo loogu talagalay nidaamka gaadiidka ee buuxiya baahida dhaqdhaqaaqa magaalada oo horumarisa cimiladeena, badbaadada, iyo yoolalka sinnaanta. Waxaan qorsheyn doonaa korriinka Seattle oo dhankasta annagoo taageerayna hagaajinta si aan uga faa'ideyno socodka, baaskiilka, gaadiidka, iyo dhaqdhaqaaqa xamuulka. Qorshaha Balaadhan waa la cusboonaysiiyay isla wakhtigaas Qorshaha Gaadiidka Seattle, kaas oo bixin doona tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan xeeladaha iyo tallaabooyinka aan qaadi doono si aan u fulino aragtideena gaadiidka wadajirka ah.

## Sida Qoysaska Seattle u Socdaalaan



## Arimaha Waawayn

### Sinaanta Gaadiidka



### Badqabka Socdaalaha



### Saamaynta Cimilada



### Helitaanka doorshooyin dheeraad oo socdaal



## Maxaan Hada Ka Shaqaynaynaa

- [Qorshaha Gaadiidka Seattle](#) – siinta inuu qof kastaaba helo doorshooyin badqaba, wax ku ool ah, oo la awoodi karo.
- [Iskuduwidada Gaadiidka Codka](#) – falanqaynta deegaanka iyo ka qaybgalka bulshada agagaarka saldhigyada tareenka fudud iyo goobaha saldhigyada.
- Mashruucyada [Hada iyo barnaamijyada](#) waxaa lagu maalgeliyaa qayb

codbixiyuhu ansixiyay [Lacagta saayidka ah Si aad Ugu Guurto Seattle](#) iyo [Talaabada Gaadiidka Seattle](#) .

## Aan Ka Hadalno Wax Ku Saabsan Mustaqbalka

Maxaa caqabado ah oo kugu wajihi kara isu socodka magaalada?

Waa maxay doorshoyinka gaadiidka kaa caawin doona inaad yarayso safarradaada baabuur-kaliga ah?

Waa maxay tallaabooyinka ay Magaaladu qaadi karto si cadaalad ah loo helo fursadaha gaadiidka ee qof kasta?

Maxaad u baahan tahay si aad u dareento badbaado, raaxaysi, iyo sharaf, haddii aad socoto, lugayso, baaskiil wadatid, aad raacdid baabuurta dadwaynaha, ama baabuur wadatid?



Udir faalooyinkaaga:  
[oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov)



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo:  
[seattle.gov/opcd/one-seattle-plan](https://seattle.gov/opcd/one-seattle-plan)

Si aad u hesho dhokumantigan oo habkale ama luuqad kale ah, la xidhiidh [oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov) si aad u codsato hoyga naafada ee xaflada ama kulanka, la xidhiidh [oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov) fursadaada ugu horaysa.

## Hal Seattle Qorshaha Balaadhan

# HORUMARINTA DHAQAALE

Seattle waa xarunta dhaqaalaha Puget Sound iyo hormuudka u ah Xeebta Galbeed xudunta u ah dhaqaalaha hal abuurka. Badda, warshadaha, tignoolajiyada, hawada sare, caafimaadka caalamiga ah, iyo waaxyo kale ayaa dhamaantood la filayaa inay sameeyaan shaqo korodhsi sanadaha soo socda. Dhaqaalaheena kala duwan ayaa naga caawinaya cimilada hoos u dhacyadii dhawaa, oo ay ku jiraan masiibada caalamiga ah iyo hoos u dhaca weyn oo dhaqaale.

Magaaladu waxay sii wadi doontaa inay la shaqayso shaqaalaysiiyaasha, dugsiyada, iyo kuwa kale si ay u horumariyaan fursadaha cusub ee shaqaalaha doonaya inay dhistaan xirfadahooda looga baahan yahay inay helaan shaqooyinka mushaharka qoyska. Waxaan rabnaa inaan u kordhino taageeradayada milkiilayaasha ganacsiyada yaryar iyo dagmooyinka ganacsiga xaafadaha ee kobcaya. Taageerada magaalada ee ururada farshaxanka ayaa sidoo kale muhiim u ah horumarka dhaqaalaha iyo nolosha dhaqanka ee magaalada. Waxaan raadineynaa inaan ballaadhino helitaan loo siman yahay dhammaan si loo helo shaqo iyo fursado ganacsi, hadda iyo mustaqbalka labadaba.

## Dhaqaalaha Horumarinta Qorshaha Balaadhan

Arinta Horumarinta Dhaqaale waxay hagi doontaa siyaasadaha Magaalada ee la xidhiidha horumarinta xoogga shaqada, taageeridda iyo kobcinta dagmooyinka ganacsiga ee xaafadaha, ilaalinta jawi caafimaad leh ee warshadaha soo koraya iyo kuwa soo koraya, iyo taageeridda faa'iidada tartanka magaalada ee qaybaha warshadaha iyo badda. Cusboonaysiinta waxaa ku jiri doona siyaasado lagu hubinayo in si siman loo heli karo mihnadaha mushaharka nolosha ee dhammaan deganayaasha, iyo gaar ahaan bulshooyinkayada BIPOC ee aan si siman u wadaagin faa'iidooyinka kobaca dhaqaalaha Seattle.

## Arimaha Waawayn

**Helitaanka shaqooyin loo simanyahay iyo fursado dhaqaale ee ganacsiyada yar-yar**



**Fursado cusub oo loogu talagalay tababar shaqo si albaabbada loogu furo si ay u helaan xirfadaha nolosha-mushaharka**



**Taageerada warshadaha muhiimka ah waaxaha noqon doona isha kobaca dhaqaalaha**



**Taageerada ururada dhaqanka iyo sugaanta**



## Maxaan Hada Ka Shaqaynaynaa

- [Warshada Seattle iyo Istaraatiijiyada Badda](#) 
- [Helitaanka Ganacsiyada](#) 
- [Horumarinta Shaqaalaha](#) 
- [Taageerada Ganacsiyada Xaafadaha](#) 
- [Taageerada Warshadaha Muhiimka ah](#) 

## Aan Ka Hadalno Wax Ku Saabsan Mustaqbalka

Sida ugu wanaagsan ee aan u xaqiijin karno helitaan shaqo oo loo simanyahay?

Sidee bay ganacsiyada xaafadaha Seattle oo dhan u barwaaqoobi karaan oo ay u horumari karaan?

Sideen u nashqadayn karnaa barnaamijyada tababarada shaqada si looga caawiyo dadka dagan inay helaan xirfado?



Udir faalooyinkaaga:  
[oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov)



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo:  
[seattle.gov/opcd/one-seattle-plan](https://seattle.gov/opcd/one-seattle-plan)

Si aad u hesho dhokumantigan oo habkale ama luuqad kale ah, la xidhiidh [oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov) si aad u codsato hoyga naafada ee xaflada ama kulanka, la xidhiidh [oneseattlecompplan@seattle.gov](mailto:oneseattlecompplan@seattle.gov) fursadaada ugu horaysa.